

Gacaliye Saaxiib,

Hal calaamad wanaagsan oo aan u jeedsannayo inta lagu jirro wakhtiyaddan adag ayaa ah urruro badan oo sida kuwaaga oo kale ah kuwaas oo gaadhay inay la wadaagaan macluumaadka illaha ay soo urruriyeen si ay ugu taageeraan qoysaska iyo ardayda Magaalooyinka Mataanaha. Waxay i siineysaa rajo ah in inbadan oo idinka mid ah aanay keliya diirada saareyn taageerida qoysaska aad si toos ah ugu adeegtaan, laakiin hubbinta in dhammaan qoysaska Magaalooyinka Mataanaha ay helaan macluumaadka ay u baahan yihiin inay ku badbaadan wakhtigan aan horay loo arag.

Toddobaadkan, Waan ku faraxsanahay in aan muujiyo dhawr bog oo urruro ka tirsan bulshadeenu ay halkan iskugu keeneen. Fadlan sii wad inaad nala soo xidhiidho, nala wadaag waxa aad baranayso, oo [noo oggolaw in aanu ogaano waxad uga baahantahay wax badan hawshayadda](#). Xasuusin ahaan, dhammaan illaha aanu soo urrurinay waxa laga heli karaa boggayagga [websaydka COVID-19](#).

Hmong American Partnership

[Bogga illaha COVID-19](#) ee HAP wuxu la wadaaga caawinaada degdegga ah, gobolka, iyo illaha kale ee bulshada ee qoysaska, dhammaan waxa lagu heli karaa luqaddo badan.

Northside Achievement Zone (NAZ)

NAZ wuxu abuuray bog leh illo badan [oo loogu tallo gelay ardayda guriga joogta](#) oo loo qaybiyey maaddo ahaan, sidoo kale waa bog [ay ku jiraan macluumaadka caawimaha aasaasiga ah](#).

Urban Ventures

Waxay soo diyaarisay liis-ka balaadhan ee taageerada [halkan](#), kaas oo lagu heli karo Isbanish, oo ay ka mid yihiin khadka labada luqaddood ee ay soo wici karaan qoysasku.

Way To Grow

Way to Grow waxay urrurisay liis-ka dhammaan illaha lala wadaagay iyaga ee ay cusboonaysiin doonaan toddobaad kasta. Waxad ka heli kartaa [halkan](#).

Kuwo kale oo aanu aragnay waxa ka mid ah [YWCA](#), [CLUES](#), [Generation Next](#) iyo [Joyce Preschool](#).

Waxan u rajeynayaa qoyskaaga iyo kuwaad jeceshahay caafimaad wanaagsan iyo deganaansho.

Waan wada joogna tani,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Osman Ahmed".

Osman Ahmed
Agaasimaha Iskaashiga Bulshada